



XAASHIDA XAQIIQDA

Hawada carceerada/ciirada, qiiqa leh: Ma og tahay waxa la sameeyo?

- **Yaree soo gaaristaada qiiqa dabka kaynta.**
- **Yaree wakhtiga lagu qaato bannaanka.**
Tani sida caadiga ah waxaa laga helaa in ay qofka ilaaliso, gaar ahaan meelaha xiran, guriga qaboojiyaha leh. Qaboojiyahaaga ka dhig dib u isticmaal “recycle” ama dib-u-wareeji “re-circulate”, marka aad joogto guriga ama aad ku dhex jirto gaarigaaga, si aad u yarayso soo gaaristaada hawada qiiqa leh.
- **Yaree wakhtiga aad ka kaga qayb qaadanayso hawlaha adag ee bannaanka laga qabanayo.**
Waxay noqon kartaa mid muhiim ah, waxtar leh in la yareeyo qiyaasta qiiqa aad neefsanayso. Waxay yarayn kartaa khataraha caafimaad inta lagu jiro dhacdada qiiqu dhacayo.
- **Biyo ku filan jirkaaga ha ku jiraan. Biyo badan cab.**
- **Yaree meelaha kale ee uu ka imaanayo qiiqa guduhu iyo busku/boorku.**
Tani waxay noqon kartaa sigaarka gubanaya, shamaca, gaaska, haaamaha gaaska, makiinadaha cunto karinta ‘stoves’ ee ku shaqaysa xaabada iyo qalabka wax lagu diiriyo, iyo wax ku nadiifinta faakiyuumka.
- **Fiiri tayada hawada ee hada lagu jiro.**
Booqo <http://oregonsmoke.blogspot.com/> si aad u ogaato tayada hawada ee hada lagu jiro.
- **Haddii aad qabto cudurka wadnaha ama sambabada ama cudurada neef mareenka, sida neefta** raac talada daryeel caafimaad bixiyahaaga ee ku saabsan ka hortagga iyo daaweynta astaamaha cudurka.